**Department of Technology Services**
15675 Ambaum Blvd SW
Burien, WA 98166

# Sida Loo Isticmaalo ee Loo Cilad Saaro Chromebook

Hoos waxaa ku yaala mushkiladaha ugu badan ee lagu arko Chromebook iyo tilmaamaga sida wanaagsan loogu wadan karo.

Linkiga waxaa ka aad ka heleysaa tilmaamaha isticmaalka Chromebook - Chromebook Kaalmo Google ah.

## Sida looga baadho Google

**Xalal badan ayaa laga heli karaa Google baadhitaankiisa.**

1. Waxa aad furtaa daaqada internetka Chrome.
2. Waxa aad ku qortaa kalmadaha aad ku baadhayso sanduuqa baadhitaanka oo enter ku dhufo.
3. Isticmaal kalmadaha baadhitaanka si aad u baadho. Tusaale ahaan, halkii aad ku qori lahayd “my child’s computer is stuck”, qor “Chromebook frozen”.

### Tilmaamta 1: Ku bilaw waxa fudud

Waxa aad doonto hadii aad raadiso, waxa aad ku bilawdaa baadhitaan fudud sida **where's the closest airport?** Waxa aad mar kasta ku dari kartaa kalmado sharax ah oo dhawr ah hadii loo baahdo.

### Tilmaamaha 2: Ku baadh codkaaga

Maka daashay wax qorista? Ku baadh codkaaga, oo dheh "Ok Google" ama dooro Microphone (Makarafoonka).

### Tilmaamta 3: U dooro kalmadaha si taxadir leh

Marka aad go'aansanayso nooca kalmada aad ku qorayso sanduuqa baadhitaanka, isku day inaad doorato kalmado ay u badan tahay inay kasoo baxaan websaytka aad doonayso. Tusaale ahaan, halka aad ka odhan lahayd madaxaa i xanuunaya, baadh madax xanuun, maadaama oo kalmadaasi ay ku jirto kalmadaha websaytyada cafimaadku isticmaalaan.

### Tilmaamta 4: Waxyaabaha yaryar haka warwarin

- Higgaadin. Saxaha higaada Google ayaa si toos ah u isticmaali doona higaada banaa la isticmaalo ee kalmada, hadii uu saxan yahay iyo hadii ay khaldan tahayba higaadaadu.
- Xarfaha Waawayn. Baadhitaanka New York Times waxa uu lamid yahay baadhitaanka new york times.

### Tilmaamaha 5: Helitaanka jawaab degdeg ah

Qaar badan oo kamid ah baadhitaanada, Google ayaa kuu qabanaya shaqada oo waxa uu ku tusayaa su'aashaada oo ku jirta natiijooyinka baadhitaanka.

- Qaamuus: Waxa aad ku hor qortaa sharaxa kalmad kasta oo aad aragto sharaxeeda.
- Xisaabinta: Geli qaacidada xisaabta sida 3*9123, ama kaga shaqee qaacidada muuqaalka ah ee murugsan.
- Badalka cabirka: Geli wixii la badalo, sida 3 doolar u badal yuuro.

## Shaxda Macluumaadka

**Sida loo baadho Google** ...... 1
**Isticmaalka Chromebook** ...... 4
**Sida Loogu Galo Ingiriisi Chromebook** ...... 4
**Como iniciar una sesión en Chromebook-Spanish** ...... 5
**Sida loo galo ama loo isticmaalo Chromebooka-Somali** ...... 6
**Muujinta Dabaynta Chromebook** ...... 7
**Cusboonaysiinta Chromebook Operation System (OS)** ...... 7
**Sawiro Shaashada Laga Qaaday** ...... 8
- **Ka qaadida sawir shaashada oo dhan** ...... 8
- **Ka qaadida sawir shaashada qayb kamid ah:** ...... 8

**Turjubaad** ...... 8
- **Ku turjubida boga Chrome** ...... 8
- **Sida loo shido loona bakhtiiyo turjubaada** ...... 8
- **Sida loo shido loona bakhtiiyo turjubaada dhamaan luuqadaha** ...... 9
- **Sida loo shido loona bakhtiiyo turjubaada luuqad gaar ah** ...... 9
- **Dadalka luuqada ee daaaqada internetka Chrome (Windows & Chromebook kaliya)** ...... 9

**Badalka Isticmaalaha** ...... 9
**Kiiboodhka iyo Badhanada Hawlaha Lagu soo Dhaweeyo** ...... 10
**Zoom-ka Shaashada** ...... 11
**Qaababka Dib Loogu Shido Chromebook** ...... 11
- **a. Dib u Shidida Chromebook** ...... 11
- **b. Khasab Dib Ugu Shidida Chromebook** ...... 12
- **c. Sadex Farood Dib Ugu Shidka Chromebook** ...... 12

**Tilmaamaha Cilad Saarida Chromebook** ...... 14
**Mushkilad 1: Shaashada ayaa aad u wayn, aad u yar ama is wareejiyay** ...... 14
**Mushkilad 2: Shaashada ayaa madaw ama banaan** ...... 14
**Mushkilad 3: Sameecadaha dhaguhu malaha cod** ...... 14
**Mushkilad 4: Kuma xidhiidhsamayo internetka Wi-Fi** ...... 14
**Mushkilad 5: Chromebook Isma Bakhtiiyo** ...... 14
**Mushkilad 6: Sistemka ayaa Aayar U Socda** ...... 15
**Mushkilad 7: Fariin – "Websaytka lama heli karo"** ...... 15
**Mushkilad 8: fariinta "Aw, Snap!"** ...... 16
**Ikhtiyaarada Gelitaanka Google** ...... 17
- **Qoraal hadal u badale** ...... 18

**Keyboard** .......... 18
**Habaynta muuqaalka** .......... 18
**Mawska iyo shaashada la taataabanayo** .......... 18
**Ikhtiyaarada Araga** .......... 19
**Ikhtiyaarada Maqalka iyo Shaqada** .......... 20

**Department of Technology Services**
15675 Ambaum Blvd SW
Burien, WA 98166

# Isticmaalka Chromebook

## Sida Loogu Galo Ingiriisi Chromebook

**1)** Bakhtiinta iyada oo la isticmaalayo badhanka shidida




**2)** Shaashada baadhitaanka, waxa aad ku qortaa 7-da god ee lambarka aqoonsiga Highline Hadii aanad garanaynin lambarka ilmahaaga, waydii macalinkiisa.




**3)** Baaswoodhka ilmahaagu waxaa weeye taariikhda uu dhashay. Waxaa weeye BB/MM/SSSS qaabka ah. Tusaale ahaan: Taariikhda dhalashada ee ah: Febraayo 5,




2012. **Baaswoodh: 02/05/2012**

**4)** Marka kowaad ee ardaygu uu galo Chromebook, baaswoodhkiisu waa **highline** Hadii uu arday kuugu jiro xanaanada caruurta ama fasalka kowaad waa inaad isticmaashaa baaswoodhkan. Hadii ilmahaaga uu weligii ku isticmaalo Chromebook dugsiga, waxaa markaa ku filan taariikhdiisa dhalashada.

**5)** Hadii aad ilmahaagu isticmaalayo "highline", baaswoodhka ah, waxa uu u sheegi doonaa inuu samaysto mid cusub. **Xaqiiji inaad u isticmaasho taariikhdiisa dhalashada qaabka ah BB/MM/SSSS**.

Waxaa muhiim ah inaad raaciso eber bilaha iyo maalmaha halka god ah. Waxaa muhiim ah in sanadku uu noqdo afar god.
Hadii aanad sidaa samaynin, ilmahaagu ma geli karo marka uu ku noqdo dugsiga.

**6)** Iminka waa inaad gashaa!

## Muujinta Dabaynta Chromebook

Marka aad geliso xadhiga dabka, waa maxay midabka laydhka muujinta ee ku jira godka dabka?

**Liimi**/ **Casaan** = dabaynaya
**Cagaar**/ **Cadaan**= dabaysmay
Ma Shidmin Laydhka Dabayntu = Hadii aanu Chromebook aanu bixinaynin laydh, waxa aad gelisaa god kale fiishta si aad u eegto hadii uu shidmo.

## Cusboonaysiinta Chromebook Operation System (OS)

Inuu nidaamka kuugu jira Chromebook uu mar kasta kuu cusboonado waxay kuu xalinaysaa mushkilad badan oo si wanaagsan ayuu kuugu soconayaa. Caadiyan waxa tan loo baahan yahay in la sameeyo bil kasta.
Lagaagama **baahnainaad ku gasho** macluumaadkaaga si aad u bilawdo nidaamka.
Gelitaanka aalada, riix meel kasta oo kamid ah muujinta si ay kuugu soo baxdo muujinta soo baxaysaayi. Guji calaamada Buuxinta (Gear)




Guji **About Chrome OS (Macluumaadka Chrome OS)**



Guji **Check for updates (Eeg cusboonaysiinta ugu danbaysa)**.




Nidaamku isaga ayaa dib isku shidi doona marka ku shubitaanka cusboonaysiinta nidaamku dhamaato. Riix oo hay badhanka shidida ilaa 5 ilbidhiqsi.

## Sawirada shaashada

Sawirada shaashadu wax badan ayay taraan waxaana kamid ah marka laga warbixinayo cilada lasoo darista Chromebook.

### Ka qaadida sawir shaashada oo dhan

Waxa aad sawir ka qaadaa shaashadaada oo dhan adiga oo riixaya **Ctrl** + . Badhanka Print Screen (Daabac Shaashada) oo ay badhaka lixaad ee dhanka bixid oo waxaa ku sawiran calaamad afar gees ah oo laba layn ku garab yaalaan. Daaqada ayaa soo bixi doonta hadhaw leh ikhtiyaarka aad ku eegi karto sawirka shaashada oo aad ku koobiyaysan karto Google Drive.

### Ka qaadida sawir shaashada qayb kamid ah:

Qayb kamid ah shaashada waxa aad ka qaadaa sawir adiga oo qabanaya **Ctrl** + **Shift** + . Waxa aad jiidi kartaa qaybiyahaaga si aad sanduuq u geliso aaga aad doonayso inay ka muuqato oo aad sawirka ka qaadayso. Daaqada ayaa soo bixi doonta hadhaw leh ikhtiyaarka aad ku eegi karto sawirka shaashada oo aad ku koobiyaysan karto Google Drive.

## Turjubaad

Badal luuqadaha Chrome oo turjun websaytyada

### Ku turjubida boga Chrome

Marka aad aragto bog ku qoran luuqad aanad fahmaynin, waxa aad isticmaali kartaa Chrome si aad u turjunto boga.

1. Kombuyuutarkaaha, waxa aad furtaa Chrome.
2. Waxa aad qabataa boga ku qoran luuqada kale.
3. Xaga sare, guji Translate (Turjun).
4. Chrome waxa uu turjubi doonaa websaytka markan.

Ma shaqaynayo? Waxa aad dib u bilawdaa boga. Hadii aanu weli shaqaynaynin, waxa aad dhanka midig gujisaa mawska adiga oo meel kamid ah boga dul jooga. Kadibna, guji Translate to [Language] (U Turjun [Luuqada].

### Sida loo shido loona bakhtiiyo turjubaada

Toos, Chrome waxa uu bixiyaa turjubaada bogaga ku qoran luuqad aanad fahmaynin.

## Bakhtii ama shid turjubaada dhamaan luuqadaha

Waxa ka maamushaa hadii Chrome aad doonayso inuu kuu turjubo bogaga.

1. Kombuyuutarkaaha, waxa aad furtaa Chrome.
2. Dhakada sare ee midig, riix More ⋮ > Settings (In Badan Buuxinta).
3. Xaga hoose, riix Advanced (Heersare).
4. Qaynta Language (Luuqada), guji Language (Luuqada).
5. Sax ama saxa ka qaad 'Offer to translate pages that aren't in a language you read'.

## Sida loo shido loona bakhtiiyo turjubaada luuqad gaar ah

Waxa ka maamushaa hadii Chrome aad doonayso inuu kuu turjubo bogaga oo luuqad gaar ah.

1. Kombuyuutarkaaha, waxa aad furtaa Chrome.
2. Dhakada sare ee midig, riix More ⋮ > Settings (In Badan Buuxinta).
3. Xaga hoose, riix Advanced (Heersare).
4. Qaynta Language (Luuqada), guji Language (Luuqada).
5. Waxaa kuxiga luuqada aad doonayso inaad isticmaasho, riix More (Inbadan) ⋮ .
   - Hadii luuqadaadu ayna ku jirin liiska, waxa aad ku dartaa adiga oo gujinaya Add Language (Ku Dar Luuqad).
6. U Wareeg bogaga la turjubayo ee luuqada oo bakhtii ama shid.

## Dadalka luuqada ee daaqada internetka Chrome (Windows & Chromebook kaliya)

Waxa aad ku buuxsan kartaa buuxinta i wada tus iyo muujinta luuqada aad doonayso. Ikhtiyaarkan kaliya waxaa laga heli karaa kombuyuutarada Windows iyo Chromebook ah.

1. Kombuyuutarkaaha, waxa aad furtaa Chrome.
2. Dhakada sare ee midig, riix More ⋮ > Settings (In Badan Buuxinta).
3. Xaga hoose, riix Advanced (Heersare).
4. Qaynta Language (Luuqada), guji Language (Luuqada).
5. Waxaa kuxiga luuqada aad doonayso inaad isticmaasho, riix More (Inbadan) ⋮ .
6. Hadii luuqadaadu ayna ku jirin liiska, waxa aad ku dartaa adiga oo gujinaya Add Language (Ku Dar Luuqad).
7. Guji Display Google Chrome (Soo Dhig Google Chrome) oo luuqad ah ama Display Chrome OS (Soo Dhig Chrome OS) oo luuqad ah.
8. Ikhtiyaarkan kaliya waxaa laga heli karaa kombuyuutarada Windows iyo Chromebook ah.
9. Dib u bilaw Chrome oo waxa aad ku buuxisaa isbadalada.

## Badalka Isticmaalaha

**Sida la iskugu kala badalo isticmaalayaasha Chromebook**

- Guiji Shaashada Buuxinta Dhakhsaha ah ee dhanka midig ee shaashadaada.
- Kadibna guji **magaca** aad ku isticmaasho.
- Kadibna guji “sign in another **user**.”
- Ka dooro macluumaadka aad doonayso **inaad u badasho** oo ku qor baaswoodhka.

## Kiiboodhka iyo Badhanada Hawlaha Lagu soo Dhaweeyo

**Oggow: Tani way kala duwan tahay qaabka Chromebook. Waxa aad gujin kartaa ctrl, alt, + keys isla mar kaliya si aad u aragto badhanka lasoo gaabiyay ee Chromebook.**

Ka bixitaanka nidaamka degdeg ah: Ctrl + Shift + Q (laba jeer samee)

Ka bax Chromebook: Waxa aad iska qabataa **Ctrl** iyo **Shift** dhanka bixid, oo taabo **Q** laba jeer, si aad uga baxdo.

**Waxa aad ku xidhaa badhanada caadiga ah kuwa lasoo gaabiyay.**
https://support.google.com/Chromebook/answer/1047364?hl=en

- ← Go to the previous page (F1)
- → Go to the next page (F2)
- Refresh your current page (F3)
- Make your page take up the full screen (F4)
- Show all your open windows (F5)
- Decrease screen brightness (F6)
- Make the screen brighter (F7)
- Turn off the sound (F8)
- Lower the volume (F9)
- Raise the volume (F10)

### Shaqada Badhanada Keyboard-ka

Keyboard ku yaal Chromebook waxaa loogu talo geley inuu kaa caawiyo isticmaalka badhanada ee saxda ah si waxa aad doonayso aad ugu qabsato.

| Badhanka | Shaqada |
|---|---|
| ← | Waxa aad qabataa boga hore ee daaqadaada taariikhdeeda (F1) |
| → | Waxa aad qabataa boga xiga ee daaqadaada taariikhdeeda (F2) |

| | |
|---|---|
|  | Dib usoo bilaw boga iminka (F3) |
|  | Waxa aad furtaa qaabka shaashada buuxda (F4) |
|  | U wareeg daaqadaada xigta (F5) |
|  | Yaree laydhka shaashada (F6) |
|  | Kordhi laydhka shaashada (F7) |
|  | Codka Bakhtii (F8) |
|  | Naaqus Codka (F9) |
|  | Dalac codka (F10) |
|  | Waxa aad ka baadhaa app-abkaaga iyo websaytka liiska app-abkaaga. Chromebook, waxa uu badhankani ku yaala dhinaca, aad caadiyan ka heleyso badhanka Caps Lock (Farta Waawayn).<br>Hadii aad isticmaalayso kiiboodh caadi ah, Windows badhanka ah ee u dhaxeeya **Ctrl** iyo **Alt** ayaa ah badhanka wax lagu baadho.<br>Si aad u shido **Caps Lock (Farta Waawayn)** si kumeel gaadh ah, riix **Alt +** badhanka **baadhitaanka**. |

## Soo Dhawaynta Shaashada

Si aad wax kasta u **waynayso**: Qabo oo hay crtl, shift + badhanka ah. Waxa aad sii haysaa calaamada + si aad u waynaysayso farta.

Si aad wax kasta u **yarayso**: Qabo oo hay crtl, shift - badhanka ah. Waxa aad sii haysaa calaamada + si aad u yaryarayso farta.

## Qaabka Dib Loogu Shido Chromebook:

### a. Dib u Shidida Chromebook

Wakhti kasta oo Chromebook aanu u shaqaynaynin si sax ah waxa aad bakhtiin kartaa gebigiisaba adiga oo riixaya badhanka dib u shidida. Wakhti kasta 90% waxa aad xalinaysaa mushkilada ku haysata.

### b. Qasab Dib u Shidida Chromebook

**<u>Waxa aad la socotaa shaqada aan la kaydin, iwm. taas oo meesha ka baxaysa marka la isticmaalayo qaabkan.</u>**

Riix oo hayn badhamada Power (Shidida) iyo Refresh (Dib u Bilawga)



### c. Sadex Farood Dib Ugu Shidka Chromebook 12

1aad: Riix oo hay badhanka **Power (Shidida)** ee  Chromebook.

2aad: Riix oo hay **ESC** oo **Refresh (Dib u Bilaw)** iyo Tap **Power (Daaqada Bakhtiinta)**



Tani waxay ku gaynaysaa shaashada kasoo kabashada.




3aad: Riix oo hay **CTRL** iyo xarafka **D**, kadibna riix enter.



4aad: Cadaynta OS waa shaashad BAKHTIISAN, taabo badhanka **Enter**.



Cadaynta OS waa shaashad bakhtiisan ayaa bixin doona laydh, waxba qaban mayso. Shaashada Developer Mode (Qaabkii Warshada) ayaa soo bixi doonta oo nidaamka ayaa dib isku bilaabi doona.

Iminka waxa aad joogtaa shaashada soo dhawaynta.




5aad: Taabo badhanka **Let's go (Ka soco)**.

Ku xidhiidhi WiFi: Meesha (Gurigaaga) - signalka Wi-Fi meesha soo

qaado oo gal ka Goobta (Dugsiga) - Dooro internetka dugsiga

6aad: Taabo badhamada **Next (Xiga)**, kadibna **Accept (Aqbalay)** iyo **Continue (Siiwad)**

Shaashada gelitaanka Enterprise ayaa soo baxaya. Hadii aanad si toos ah ugu jirin waxa aad gelisaa **cinwaanka Gmail-ka dugsiga** iyo baaswoodhka. Markale gal si aad u samaysato xisaabtaada Chromebook.

# Tilmaamaha Cilad Saarida Chromebook

## Mushkilad 1: Shaashada ayaa aad u wayn, aad u yar ama is wareejisay

Riix oo hay badhanada ah **Ctrl** iyo **Shift** iyo badhanka ku haboon ee keyboard-ka.

**Ctrl** **Shift**  Waxa aad miisaanka shaashada ku celisaa ka uu ku yimid.

**Ctrl** **Shift**  Waxa aad kordhisaa miisaanka shaashada, adiga oo waawaynayna waxa kasoo muuqda shaashada.

**Ctrl** **Shift**  Yaree miisaanka shaashada, adiga oo yaraynaya waxa kasoo baxaya shaashada.

**Ctrl** **Shift**  Waxa aad wareegaa shaashadaada 90 digrii.

## Mushkilad 2: Shaashada ayaa madaw ama banaan

1. Waxa aad xaqiijisaa in Chromebook-gu uu ku jiro dabka.
2. Waxa aad xaqiijisaa inuu Chromebook-gu shidan yahay adiga oo gujinaya badhanka shidida.
3. Riix**kordhinta iftiinka shaashada**badhanka ah dhawr jeer, oo kadibna eeg hadii uu kordhay iftiinka shaashadu. Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan kordhinta iftiinka shaashada badhanka ah, waxa aad ka eegtaa maqaalka aqoonta ee Dell Knowledge ee Tilmaamaha Keyboard-ka Chromebook-ga Dell ah.
4. Dib u shid Chromebook-ga adiga oo qabanaya badhanka shidida ilaa inta ay bakhtiyayso aaladu, kadibna mar kale shid.

## Mushkilad 3: Sameecadaha dhaguhu malaha cod

Waxa aad eegtaa buuxinta codka iyo inuu xidhiidhsan yahay.

1. Waxa aad eegtaa inay sameecadahaaga dhaguhu si wanaagsan ugu jiraan oo ayna lahayn uskag
2. Waxa aad xaqiijisaa in xaga hoose ayna banaanka joogin
3. Waxaad masaxdaa cache oo mar kale shid

## Mushkilad 4: Kuma xidhiidhsamayo internetka Wi-Fi

Waxa aad eegtaa nidaamka saaacada si aad u xaqiijiso in calaamada Wi-Fi ay buuxdo. Hadii ay madhan tahay (banaan), markaa wuu bakhtiisan yahay Wi-Fi-gaagu. Waa tan sida loo hagaajinayaa:

Talaanada 1: Riix calaamada Wi-Fi-ga ee ku xigta saacada nidaamka.

Talaabada 2: Riix calaamada Wi-Fi marka kale ee muujinta soo boodaysa.

Talaabada 3: Calaamada Wi-Fi-gu waa inay noqotaa buluug marka Chromebook-gaagu uu ku xidhiidhsamo internetka. Waxa aad ka arkaysaa liiska internetka la heli karo.

## Mushkilad 5: Chromebook Isma Bakhtiiyo

- Danbee. Ha bakhtiinin muujiyaha xaalada baytariga maadaama oo uu khaldanaan karo. Aynu dabayno dhawr saacadood kahor inta aynaan dib u shidin.
- Waxa aad haysaa badhanka shiditaan 30 ilbidhiqsi oo qasab kadib ugu shid.
- Waxa aad eegtaa xadhiga xaga danbe iyo fiishta.

## Mushkilad 6: Sistemka ayaa Aayar U Socda

Waxaad masaxdaa cache iyo cookies.

1. Kombuyuutarkaaga, waxa aad ka furtaa daaqada internetka Chrome.
2. Dhakada sare ee midig, riix More (In Badan) ⋮ .
3. Riix More tools (Agab badan) › Madax macluumaadka daaqada.
4. Xaga sare waxaad ka doorataa saacadu intay u dhaxayso. Masax wax kasta, dooro Wakhti Kasta.
5. Waxaa ku xiga "Cookies iyo macluumaadka websaytka" iyo Sawirada galay cache-ka iyo faylasha," sax sanduuqyada.
6. Riix Clear data (Masax macluumaadka).

## Mushkilad 7: Fariin – "Websaytka lama heli karo"

Tani waxay ka dhigan tahay in Google Chrome uu waayay oo uu soo furi kari waayay websaytka aad isku dayayso inaad booqato. Si aad u hagaajiso, waxa aad isku daydaa talaabooyinka hoose.

**Eeg cinwaanka websaytka:**

Hadii aad ku aragto fariinta "ERR_NAME_NOT_RESOLVED" or "ERR_CONNECTION_REFUSED" daaqadaada internetka, waxa aad isku daydaa talaabooyinkan:

1. Eeg cinwaanka websaytka (URL) ee ku qoran qaybta cinwaanka si aad u xaqiijiso in aad gashay websaytka saxda ah.
2. Hadii aad eegtay, waxa aad isku daydaa inaad isla websaytkaas ku furto kombuyuutar kale oo ku xidhiidhsan isla internetkan.
3. Hadii aanad ka arkaynin websaytka kombuyuutarkaaa, waxa aad eegtaa hadii inetnetku uu kuu xidhiidhsan yahay. Hadii uu kuu xidhiidhsan yahay, waxaa dhici karta in aanu websaytku shaqaynaynin.

**Masax cookoies-kaaga:**

Cookies-yadu waxaa weeye faylal ay abuuraan websaytyada aad booqatay si ay u kaydiyaan macluumaadka, sida macluumaadkaaga ama waxa aad doorbidayso. Mararka qaar, faylal cookies oo aan hagaagsanayn ayaa keeni kara khaladka. Si aad u masaxdo cookies-kaaga:

1. Kombuyuutarkaaha, waxa aad furtaa Chrome .
2. Xaga sare, ka dooro More ⋮ › Settings (Inbadan Buuxi).
3. Xaga hoose, dooro Advanced (Heersare).
4. Qaybta "Privacy and security", ka dooro Clear browsing data (Masax daaqada macluumaadkeeda).
5. Dooro inta uu wakhtigu u dhaxeeyo › Cookies-ka iyo macluumaadka websaytyo kale › Masax macluumaadka.

## Mushkilad 8: fariinta “Aw, Snap!"

Hadii aad aragto khaladka "Aw, Snap", Chrome waxa mushkilad ay ka haysataa furitaanka boga. Waxa aad sidoo kale arki kartaa boga oo aayar u furmaya ama aan gebi ahaanba furmaynin.

Si aad u hagaajiso, waxa aad isku daydaa inaad kuwa hoose hagaajiso.

**a. Dib u fur boga**

Xaga sare, riix Reload (Dib u fur) ⟳ Caadiyan, marka uu bogu dib u furmo mushkiladu way xalismaysaa.

**b. Waxa aad eegtaa internetku inuu shaqaynayo**

Waxa aad xaqiijisaa in kombuyuutarkaagu ku xidhiidhsan yahay Wi-Fi ama internet xadhig ah.

**c. Masax cache-gaaga**

**Waxaad masaxdaa cache iyo cookies**

1. Xaga sare, riix More (Inbadan) ⋮ > More tools (Agab badan) > Clear browsing data (Madax macluumaadka daaqada).
2. Waxaa ku xiga "Time range," dooro All time (Dhamaan wakhtiga).
3. Dooro Sawirada Cache iyo faylka galay iyo Cookies iyo macluumaadka websaytka kale. Ha dooran noocyada kale ee macluumaadka.
4. Riix Clear data (Masax macluumaadka).
5. Waxa aad isku daydaa inaad dib u furto daaqada khaladka muujinaysay.

**d. Xidh daaqadaha kale, egestenshinada, iyo app-abka**

Waxaa dhici karta in aaladaadu ay buuxdo, ma furi kartid websaytka adiga oo sidoo kale uu kuu shidan yahay app-abkaagu, egestenshinadaada, iyo barnaamijyadaadu.

1. Masad kaydka:
   - Waxa aad xidhaa daaqad kasta marka laga tago ta muujinaysa fariinta khaladka.
   - Bakhtii app-babka kale ama barnaamijyada kale ee furan, jooji wixii app-ab ama fayl aad lasoo degayso.
   - Waxa aad ka tuurtaa wixii egesteenshinada aanad u baahnayn Chrome. Xaga sare, guji More (Inbadan) ⋮ > More tools (Agab badan) > Extensions (Egestenshin). Egestenshinka aanad isticmaalin, guji Remove (Masax).
2. Waxa aad isku daydaa inaad dib u furto daaqada khaladka muujinaysay.

**e. Dib u shid kombuyuutarkaaga**

## Ikhtiyaarada Gelitaanka Google

**Akhriyayaasha iyo wayneeyayaasha shaashada taageeradayaasha daaqada Chrome, waxay siiyaan dadka aan sida wanaagsan wax u arag fursad ah inay si wanaagsan ugu soo dhaweeyaan boga, midab wanaagsan iyo egestensh**

| | |
|---|---|
| Isticmaal TalkBack si aad uga gasho websayt Chrome. | https://support.google.com/chrome/answer/2633135 |
| Qaababka loogu talo galay dadka aan si wanaagsan waxba u arag | https://sites.google.com/a/chromium.org/dev/user-experience/low-vision-support |
| Teknooloojiyada kaalmada ah ayaa wax tarta | https://sites.google.com/a/chromium.org/dev/user-experience/assistive-technology-support |
| Kusoo dhawaysashada keyboard-ka | https://support.google.com/chrome/answer/157179 |
| Badalka cabirka qoraalka, sawirka iyo fiidyawga | https://support.google.com/chrome/answer/96810 |
| Gelitaanka keyboard-ka Chrome | https://sites.google.com/a/chromium.org/dev/user-experience/keyboard-access |
| Egestenshinka Chrome ee kordhinta iftiinka | https://chrome.google.com/webstore/detail/high-contrast/djcfdncoelnlbldjfhinnjlhdjlikmph |
| Gelitaanka egestenshinada Chrome | https://chrome.google.com/webstore/category/ext/22-accessibility |

| **Isticmaal talaabooyinkan si aad u hesho qaababka gelitaanka ee Chromebook-ga.** |
|---|
| 1. Xaga sare ee midif, ka dooro saacada. Ama waxa aad isla qabataa Alt + Shift + s. |
| 2. Dooro Settings (Buuxi) (calaamada badhanka) |
| 3. Xaga hoose, dooro Advanced (Heersare). |
| 4. Qaybta "Accessibility", ka dooro Manage accessibility features (qaabka gelitaanka maareynta) |

| | | |
|---|---|---|
| **Qoraalka codka loo baddalayo** | | |
| Akhriyaha shaashada ku jira | Chromebooks waxa uu leeyahay akhriye shaashadeed oo la socda oo loo yaqaan ChromeVox, taas oo dadka u suurto gelinaysa indhaha la' inay isticmaalaan nidaamka uu ku shaqeeyo Chrome. | https://support.google.com/Chromebook/answer/7031755 |
| Dooro ku hadal | Waxa aad ku maqli kartaa boga oo dhamaystiran cod dheer adiga oo isticmaalaya akhriyaha shaashada ee la socda Chromebook ama waxa aad dhagaysan karta qayn kamid ah boga, oo ay ku jiraan kalmado gaar ah, cod dheer oo uu soo saaro Dooro hadalka. | https://support.google.com/Chromebook/answer/9032490 |
| **Keyboard** | | |
| Badhanadu meesha ay ku dhajisan yihiin | Waxa aad isticmaashaa xarfaha lagu soo dhaweeyay keyboard-ka adiga oo gujina hal xaraf markiiba halka aad dhawr xaraf mar kaliya isla qaban lahayd. | https://support.google.com/Chromebook/answer/177893#onehandshortcut |
| Keyboard-ka shaashada | Si aad ugu qorto ama gacanta qoraal lagu qoray ama si loogu daro sawir fayl, waraaqo, iyo iimeel, waxa aad isticmaali kartaa keyboard-ka shaashada. | https://support.google.com/Chromebook/answer/6076237 |
| Shid yeedhiska (hadal si aad u qorto) | Waad hadli kartaa si aad qoraalka u geliso badnaa meelaha aad caadiyan ku qori jirtay. Oo waxa aad xarakada gelin kartaa adiga oo odhanaha "koomo," "joogsi". | https://support.google.com/Chromebook/answer/177893#typewithvoice |
| **Habaynta muuqaalka** | | |
| Waxa aad badashaa qaabka shaashadaada | Waxa aad waynayn ama yarayn kartaa wax kasta oo ku yaal shaashadaada, adiga oo isbadalaya qaabka shaashada. | https://support.google.com/Chromebook/answer/6320705#Chromebook_screenresolution |
| **Mawska iyo shaashada la taabto** | | |
| Toos u guji | Waxa aad isticmaali kartaa tilmaamaha inuu qaado ficilo toos ah marka uu tilmaamuhu joojiyo dhaqaaqa wakhti gaar ah. | https://support.google.com/Chromebook/answer/9441453 |
| Soo jiid | Ku qabo oo kusoo jiif fartaada si aad u dhaqaajiso shayada | https://support.google.com/Chromebook/answer/177893#tapdrag |

| Ikhtiyaarada Araga | | | |
|---|---|---|---|
| Akhriyaha shaashada | Chromebooks waxa uu leeyahay akhriye shaashadeed oo la socda oo loo yaqaan ChromeVox, taas oo dadka u suurto gelinaysa indhaha la' inay isticmaalaan nidaamka uu ku shaqeeyo Chrome. | Waxa aad u shidi ama ka bakhtiin kartaa ChromeVox bog kasta adiga oo riixaya Ctrl + Alt + z. Taableetka: riix oo hay badhamada Naaqusida + dalicida codka 5 ilbidhiqsi. Inta aad hayso badhamada, waxa aad maqlaysaa cidka sheegaya inuu shaqayno. Waxa aad sii haysaa badhanka, kadibna ChromeVox ayaa bilaabaya inuu hadlo. | https://support.google.com/Chromebook/answer/7031755 |
| Taageerada farta indhoolka | Waxa aad ku xidhi kartaa UBS ama Buluutuut soo dhiga shaashada Farta Indhoolka si macalimiinta iyo farsamo qayaanadu ay ula shaqayn karaan ardayda indhaha la'. | Geli: Geli aaladaada farta indhoolka godka USB-ga Chromebook-gaaga. Dhawr ilbidhiqsi kadib, Chromebook-gu waxa uu si toos ah u garan doonaa aalada, oo waxa uu shidi doonaa ChromeVox hadii aanu hore u shidnayn. Ku xidhida Buluutuutka: Si aad ugu xidhiidhiso Buluutuutka ChromeVox, Guji Search (baadh) + o + kadibna o. Waxa aad raacdaa tilmaamaha kasoo baxaya shaashada. | https://support.google.com/Chromebook/answer/7020014?hl=en&ref_topic=9016892 |
| Waxa aad ka heshaa sawir sharaxaya Chrome | Marka aad isticmaalayso akhriyaha shaashada ee Chrome, waxa aad ka heli kartaa sharaxa sawirka aan sumada lahayn, tusaale ahaan, sawir aan lahayn dhamaan qoraalka. Sawirka waxaa loo diray Google si loo sameeyo sharaxa. Hadii aanu Google sharixi karin sawirka, akhriyaha shaashadu waxay odhanaysaa "No description available." | Eeg linkiga tilmaamaha sida loo shidayo sharaxa sawirka ama loo bakhtiinayo iyo sida loogu shidayo sharaxa sawirka buuxinta Chrome. | https://support.google.com/Chromebook/answer/9311597?hl=en&ref_topic=9016892 |

| Ikhtiyaarada Maqalka iyo Shaqada | | | |
|---|---|---|---|
| Dhageysiga | Sharaxa la socda | Helitaanka sharaxa la socda fiidyawga ee buuxinaya ugu yaraan heerarka ugu danbeeya. | https://support.google.com/drive/answer/1372218?co=GENIE.Platform%3DDesktop&hl=en |
| Dhageysiga | Dhagayso qoraalka kor uu u akhriyayo | Waxa aad ku maqli kartaa boga oo dhamaystiran cod dheer adiga oo isticmaalaya akhriyaha shaashada ee la socda Chromebook ama waxa aad dhagaysan karta qayn kamid ah boga, oo ay ku jiraan kalmado gaar ah, cod dheer oo uu soo saaro Dooro hadalka. | https://support.google.com/Chromebook/answer/9032490?hl=en&ref_topic=9016892 |
| | | | |
| Tabarta | Keyboard-ka shaashada | Si aad ugu qorto ama gacanta qoraal lagu qoray ama si loogu daro sawir fayl, waraaqo, iyo iimeel, waxa aad isticmaali kartaa keyboard-ka shaashada. | https://support.google.com/Chromebook/answer/6076237?hl=en&ref_topic=9016892 |
| Tabarta | Buuxinta shaashada la taabto | Buuxinta gaarka ah ee shaashada la taabto waxa ay ogoshahay gujinta tooska ah, taabo soo jiidka ama taablo wixii la gujin jiray. | https://support.google.com/Chromebook/answer/1047367?hl=en# |
| Tabarta | Buuxinta keyboard-ka | Buuxinta keyboard-ka gaara ah waxaa lagu habeeyaa xadiga waxyaabaha kusoo noqnoqda keyboard-ka iyo wakhtiga dib u dhaca kahor inta aan lagu qorin kaalmada saxda ah ee badhana soo noqnoqda. | https://www.youtube.com/watch?v=r-lytoycpsc&list=PL5aqr5w5fRe7QWzXhqxrillVduWEmLHM2&index=8&t=0s |
| Tabarta | Badhanadu meesha ay ku dhajisan yihiin | Waxa aad isticmaashaa xarfaha lagu soo dhaweeyay keyboard-ka adiga oo gujina hal xaraf markiiba halka aad dhawr xaraf mar kaliya isla qaban lahayd. | https://www.youtube.com/watch?v=r-lytoycpsc&list=PL5aqr5w5fRe7QWzXhqxrillVduWEmLHM2&index=8&t=0s |
| Tabarta | Shayada tooska u gujisma ee Chromebook | Waxa aad isticmaali kartaa tilmaamaha inuu qaado ficilo toos ah marka uu tilmaamuhu joojiyo dhaqaaqa wakhti gaar ah. Qaabkan waxa uu ka caawin karaa isticmaalayaasha inay la socdaan matoorka. | https://support.google.com/Chromebook/answer/9441453?hl=en&ref_topic=9016892 |